




Home Link - Somali



Home Links Xirriirinta Guriga Cutubka 4: Dunida Midabka: Toddobaadka 2

Qoysaska Qaaliga ah: Cutubkan wuxuu ilmahaagu baran doonaa midabada. Isku day ugu yaraan saddex kamid ah hawlaha waxbarasho ee xiisaha leh, ama dhamaantood samee! Waxa ugu muhiimsan waa inaad ku raaxaysato wakhtiga yar ee uu cunugaagu wax ku baranayo waxa ka dhacaya fasalka. Fadlan midabee sanduuqyada hawlaha aad doorato, kuna soo celi foomkan dugsiga Isniinta soo socota.

XARABEYSO!

Magaca Ilmaha: _____

<p style="text-align: center;"><u>Luqadda</u></p> <p>Waxaan Basaasayaa Midabada Gudaha: Ka codso ilmahaaga inuu kaala qeybqaato ciyaarta waxaan basaasayaa adigoo isticmaalaya midabada. U sheeg cunuggaaga, "Waxaan ishayda yar ku basaasayaa wax _____ (buluug) ah. Weydii ilmahaaga in uu qiyaaso waxa aad basaasaysid. Kadibna ka codso ilmahaaga inuu markiisa noqdo "Wax basaasaha."</p>	<p style="text-align: center;"><u>Sheeko-sheegid</u> (La xiriira <i>Nana in the City</i> ee ay qortay Lauren Castillo)</p> <p>Dareemaya Geesinimo: U sheeg ilmahaaga sheeko ku saabsan waqti aad dareentay qof geesi ah oo wada matala.</p> <p>Bilaawayaasha Wadahadalka:</p> <ul style="list-style-type: none"> ● Goorma ayaad dareentaa geesinimo? ● Maxaad u dareentay habkan?
<p style="text-align: center;"><u>Qorista/Akhrinta</u> (La xiriira <i>Nana in the City</i> ee ay qortay Lauren Castillo)</p> <p>Khariidadaha Qasnada: Ku martiqaad ilmahaaga inuu sawiro khariidad khasnadeed oo uu kuu sheego. Haddii ilmahaagu uu u baahan yahay caawimo, wada sameeya khariidada</p> <p>Bilaawayaasha Wadahadalka:</p> <ul style="list-style-type: none"> ● Xaggee ayay taalaa khasnadu? ● Sidee ayay khariidadu i nooga caawinaysaa inaan helno? ● Sidee khariidadaadu ugu egtahay ama uga duwan tahay khariidada wadada tareenka ee dhulka hoos marta? <p>Ereyada aad Ku Isticmaali Kartid Wadahadalkaaga:</p> <ul style="list-style-type: none"> ● <i>khariidad, khasnad, goob, qarsoon</i> 	<p style="text-align: center;"><u>Hadal iyo Akhris Wadajir Ah</u> (20 daqiiqadood)</p> <p>Lagu bilaawayaasha Wadahadalka:</p> <ul style="list-style-type: none"> ● Waa maxay qeybta sheekada ka mid ah oo aad ugu jeceshahay? ● Waa maxay waxa ugu horreeya ee ka dhaca sheekada? ● Maxaad u maleyneysaa in uu yahay waxa soo xiga oo dhici doona?
	<p style="text-align: center;"><u>Xisaabta</u></p> <p>Ugaahdsiga Qaababka: Raadi 3 qaab oo kala duwan oo ku hareereysan gurigaaga oo kala hadal ilmahaaga sida qaabkee kasta uu wax ugu celiyo.</p> <p>Bilaawayaasha Wadahadalka:</p> <ul style="list-style-type: none"> ● Maxaad ka ogaatay qaabkan? ● Sidee ayuu qaabku wax ugu celiyaa? (tusaale ahaan, [casaan, buluug], [casaan, buluug], [casaan, buluug].) ● Maxaa xiga? (tusaale "casaan-buluug ayaa ku xiga.")

Buug-gelinta Akhrinta

Hubi maalin walba in adiga iyo ilmahaaga aad wada akhrisaan sheeko. Buugagta waxay noqon karaan kuwa ah af Ingiriisi ama luuqada gurigaaga. Booqo maktabadda dadweynaha xaafaddaada si aad u hesho buugaag badan oo ku saabsan midabada!

Isniin _____ Talaado _____ Arbaco _____ Khamiis _____ Jimco _____ Sabti _____ Axad _____

Buugaga aan ku akhrino dugsigu:

Nana in the City qorey Lauren Castillo

Buugaag kale adiga iyo ilmahaaga laga yaabo in aadjeclaataan:

White Rabbit's Colors qorey Alan Baker
Pete the Cat: I Love My White Shoes qorey James Dean

Tallooyinka si wadajir ah u akhrinta:

- Wada fadhiista meel xasilloon oo degan.
- Marka aad akhrinayso, iftiimi oo qeex erayada cusub. Tusaale ahaan, "**Geesinimo** macneheedu waa muujin la'aanta cabsi ama dareemida qof awood badan."
- Marka aad akhrinayso, weydii ilmahaaga su'aalaha ku saabsan buugga. Tusaale ahaan, "Sidee ayay Nana ugu kaalmeysay wiilka inuu dareemo mid aad u awood badan?"